

Loogu tala galay adigaaga shaqo la'aanta ah Deynka leysinka gaari wadidda – caawimaad ku aaddan dadaalka loogu jiro in shaqo la helo

Adigaaga shaqo la'aanta ah ee buuxiyay shuruudaha qaarkood waxaad lacag ka deynsan kartaa CSN si aad u qaadatid lesyin gaari wadid. Shaqo bixiyayaal fara badan waxay maanta dalbadaan in qofka shaqo doonka ahi uu haysto leysin gaari wadid, sidaas awgeedna in la haysto leysin gaari wadid waxay fududeyn kartaa in shaqo la helo.

Intan ayaad deynsan kartaa

Ugu badnaan waxaad deynsan kartaa 15 000 oo koron. Lacagta si qeyb-qeyb ah ayaa loo bixinayaa, mar kasta oo lacagta la bixinayana waxaa la dhiibayaa 5 000 oo koron. Si aad lacag ugu deynsan kartid waxbarashada leysinka gaari wadidda waa in iskool wiidadaada ay aqoonsantahay Hey'adda Guddiga Gaadiidku (Transportstyrelsen).



Ma dooneysaa in aad wax dheeraad ah ogaatid?

Gal bogga intarneetka ee csn.se/korkortslan ama naga soo wac 0771-276 000.

Yaa qaadan kara deynka leysinka gaari wadidda?

Si aad xaq ugu yeelatid deynka leysinka gaari wadidda waa in aad baagamuuddo ahaataa, da'daaduna u dhexeyso 18–47 sano. Shuruuduhu wey kala duduwanyihiin iyadoo ay taasi ku xirantahay in ay da'daadu u dhexeyso 18–24 sano ama 25–47 sano (shuruudaha oo buuxa ka eeg bogga soo socda). Deynka waxaa loogu tala galay leysinka swiidhishka ee wadidda gawaarida yar-yar ee B, micnaha gawaarida shakhsiga ah iyo gawaarida xamuulka ee yar-yar.

Waxaa xitaa jirta ula jeeddo ah in dhallinyarada aan shaqo la'aanta ahayn ay qaadan karaan deynka leysinka gaari wadidda. Waxay taasi khuseysaa dadka da' ahaan u dhexeeya 19–20 sano ee dhammeeyay waxbarashada dugsiga sare. Waxaa dhici karta in taas waqtigeedu uu noqdo sanadka 2019, waana wax ay xukuumaddu markaa go'aan ka gaari doonto.

Sidan ayaad u codsaneysaa

Waxaad deynka gaari wadidda ka dhex codsaneysaa Mina sidor ee bogga csn.se. Marka uu go'aankaagu kaaga yimaado CSN waxaad dalban kartaa in qeybta ugu horreysa ee lacagta lagu soo diro. Macnaha lacagtu si ootomaatig ah isagama imaaneyso. Si aad lacagta u heshid waa in iskool-wiidadu uu CSN-ta u soo gudbiyaa warbixin ku aaddan in aad agtooda wax ka dhigatid. Iskool-wiidadu wuxuu dabadeed CSN-ta u soo gudbinayaa warbixin ku aaddan kharashaadkaaga, waxaadna markaas dalban kartaa in kharashka laguugu soo shubo hadba inta loo baahanyahay.

Deynka waa la soo celinayaa

Deynka gadaal ayaa laga soo celinayaa. CSN-tu waxay xitaa lacagta la bixiyay ka qaadanaysaa dulsaar. Caadi ahaan waxaad bil walba bixineysaa 300 oo koron. Waxay taasi ka dhigantahay in haddii aad deynsatid 15 000 oo koron ay kugu qaadaneyso in 4 sano wax yar ka badan inaad deynka dhiibtaankiisa dhameystirtid. Dabcan haddii aad dooneysid in aad lacagta isaga dhiibtid si sidaas ka degdeg badan waa leesaga dhiibi karaa.

Shuruudaha loogu tala galay in lagu qaato deynka leysinka gaari wadidda

Shaqo doon 18–24 sano

Waa in aad shaqo doon ahaan uga qorantihid Xafiiska shaqada. Waxaa intaas dheer in ay khasab tahay in aad buuxisid mid ka mid ah labadan shardi:

- Waxaad ka qeyb qaadataa barnaamijka damaanad qaadka shaqada- iyo horuumarka ee Xafiiska shaqada ama damaanad qaadka shaqada ee dhallinyarada. Waana in aad barnaamijka ku qorantihid maalinta uu codsigaagu u imaanayo CSN.
- Waa in aad ka qeyb qaadatay barnaamijka saldhigashada (etablering) ee Xafiiska shaqada ama aad lahayd qorshe saldhigasho ugu yaraan seddax bilood oo isku xiran ilaa iyo maalinta ka horreysa marka uu codsigu soo gaarayo CSN.

Shaqo doon 25–47 sano

Waa in aad shaqo doon ahaan uga qorantahay Xafiiska shaqada. Waana in aad sidaas ahayd ugu yaraan lix bilood oo isku xiran ilaa iyo maalinta ka horreysa marka uu codsiga soo gaarayo CSN. Waxaa intaas dheer in ay khasab tahay in aad buuxisid mid ka mid ah labadan shardi:

- In aad waqtigaas oo dhaan shaqo la'aan ahayd.
- In aad ka qeyb qaadatay barnaamijka siyaasadda suuqa shaqada ama aad waqtigaas oo dhan lahayd qorshe saldhigasho.